

DHACDOOYINKA MAADDOOYINKA HALISTA AH

Ama ha ahaadeen wasaqda warshadaha, kiimikada, iyo suntan, ama jeermi-dileyaasha guryaha iyo carfiyeyaasha ha noqdeene, maaddooyinka halista ahi waa qayb ka mid ah nolosheenna.

Maaddooyinka halista ahi waa walxaha iyadoo ay ugu wacan tahay dabeecaddooda kiimikaad, khatar wax ku ool ah ku keeni kara nafta, caafimaadka, ama hantida haddii la sii daayo ama loo isticmaalo si aan habboonayn.

Khataruhu waxay jiri karaan marka la samaynayo:

- Wax soo saarid (sameyn).
- Kaydin.
- Safrin.
- Isticmaalid.
- Qubid..

Ilaaha ay u badan tahay in ay maaddooyin halis ahi ka yimaadaan waxaa ka mid ah:

- Warshadaha kiimikaad.
- Saldhigyada adeeg ee maxalliga ah, oo kaydsha ama qaybsha gaaska iyo shidaalka naaftada.
- Cusbitaallada, kaydsha noocyo badan oo raadiyoo-shucaac ah ama maaddooyin ololi kara.
- Qashin-qubyada maaddooyinka wasakhda ah, oo iyagu hilaadda dhan 30,000 Maraykanka gudihisa.
- Baabburta [maaddooyinkaa] Safrisa, oo ay ku jiraan taraagyada, tareennada, maraakiibta, iyo dayuuradaha.

Dhacdooyinka maaddooyinka halista ah waxay u kala bixi karaan laga billaabo kiimiko ku tifiqday hay-weey ilaa iyo biyaha dhulka oo ku sumooba gaaska mesayn (methane) oo si dabiici ah u dhasha. Dhacdooyinka maaddooyinka halista ahi waxay ka dhici karaan meel kasta.

La xiriir xafiiskaaga maxalliga ah ee maaraynta xaaladda degdegga ah si aad u ogaato in mujtamacaagu leeyahay Guddiyada Qorshaynta Gurmada oo Maxalli ah (Local Emergency Planning Committees (LEPCs) iyo weliba xigta ay baxshaanba.

DHACDOOYINKA MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)

Ka hadal dhamaan qodobbada diyaarsanaanta.

- Soo ogow waxa kugu dhici kara.
 - Weydii LEPC ama xafiiskaaga maaraynta gurmada wixii ku saabsan qorshayaasha uu mujtamucu ka leeyahay wax ka qabashada dhacdooyinka maaddooyinka halista ah oo ka dhici kara warshadaha maxalliga ah ama dhismayaasha kale amase shilalka gaadiidka oo ku lug yeelan kara maaddada halista ah.
 - Wax ka weydii LEPC kaydinta iyo isticmaalka maaddooyinka halista ah ee aaggaaga maxalliga ah. Xusuusnow in qaar ka mid ah kiimikooyinka suntan ahi aysan lahayn wax ur ah.
 - U isticmaal xogta aad ururisay in aad ku qiimayso khataraha qoyskaaga. Soo ogow sida aad ugu dhawdahay warshado hay-weeyp, ama jidadka tarenka kuwaas oo dhamaantood soo saaro kara ama lagu safrin karo wasaqda suntan ah.
- Ku darso khataraha qorshahaaga gurmada ee qoyska.
 - U diyaarsanow in aad qurto. Geeddigu wuxuu ku ekaan karaa saaxado dhawr ah ama dhawr beri.
 - U diyaarsanow in aad meel ku qabbato; taasi waxa weeye in aad bedbaado biddo hoygaaga ama dhisme kasta oo aad ku jirto marka ay dhacdo sii-deynta kiimikaad. Markaad joogtid gurigaaga, waa in aad xulataa qof dhexda ah oo loo isticmaalo “qof dugsoon.”
 - Isku duwo guntin gabbaad oo la isticmaalo oo koollee gabbaadka haddii waxa dhacay ay yihiin sii-deyn kiimikaad.
- Ku celceli oo joogtee qorshayaashaada ah sida uu shaqsiga ama qoysku wax uga qaban lahaa dhacdo maaddooyinka halista ah ku lug leh.
- Baro habka xogsiinta ama digniinta ee mujtamacaaga. Soo ogow sida ay saraakiisha maxalliga ahi kuugu soo sheegi doonaan xaaladda maaddooyinka halista ah, iyo weliba waxay tahay in aad samayso si aad u bedbaadiso naftaada iyo tan qoyskaaga ama dadka kula shaqeyta.

Digniinaha waxaa ka mid noqon kara:

- Seeriga digniinta ee bannaanka ama hoonan.
- Habka Digniinta Gurmada (EAS)—Xog ay bixiyaan raaadiyaha iyo telefshanka.
- “Dhamaantood-Wicid” telefoon u dirid ah—Waa hab iswada oo loo diro farriimaha duuban.
- Ogeysiinta jihaynta deegaannada—Farriin loogu dhawaaqo darsaasha iyadoo baabuur ay cod-baahiyeyaal ku xiran yihiin lagu hadlaayo.

DHACDOOYINKA MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)

Kuwani waa tallaabooyinka bilowga ah ee la qaado haddii lacalla ay dhacdo dhacdo maaddo halista ah ku saabsan:

- Ka tag meesha markiiba. Ka soo warran xaaladda adigoo jooga meel nabdoon. Taaq-sare iyo ur-koraad ka jira meesha gurmada u baahan.
- Haddii aad aragto (ama uriso) dhacdo maaddo halis ah ku saabsan, wac 9-1-1, lambarkaaga ogeysiinta ee maxalliga ah, ama waaxda dab-demiska sida ugu dhaqso badan ee suuraggalka ah.
- Haddii aad maqashid baaq digniineed, dhegayso raadiyaha ama telefashannada maxalliga ah si aad u hesho xog dheeraad ah. Dabadeed, u raac tilmaamaha si taxaddar leh.
- Ka dheerow meesha ay wax ka dhaceen si aad u yarayso halista sumoobidda.
- Haddii dibedda lagugu gabto, xusuusnow in gaasaska iyo ceeryaantu ay guud ahaan ka culus yihiin hawada. Isku day in aad joogto hir-kore, taq-sare, iyo ur koraad. (Maaddooyinka halista lehi waxaa si dhaqso ah u qaadi kara biyaha iyo hawada.) Isku day in aad tagto ilaa nus-mayl (10 baloog beled) oo ka baxsan meesha khatarta; dhacdooyin badan, waxaad u baahan doontaa in aad kaba sii fogaato.
- Haddii aad gaari ku jirto, istaag oo raadso gabbaad ku yaalla dhisme joogto ah, haddii ay suuroggal tahay. Haddii ay khasab tahay in aad gaarigaaga ku dhex jirtid, daaqaadaha iyo layrshayaasha gaarigaba xir, ee sii-ga iyo iyo hiitkabana xidh.
- Haddii lagugu wargeliyo in aad qurigaaga ka guurto, markiiba sidaa yee! Haddii ay madaxdu muujiso in aad haysato waqti ku filan dhamaan daaqaadaha xir, xir leyrshayaasha, atigga, kuleelshaha iyo marwaxadaha hawo keenta ahna demi si aad u dhinto sumoobidda.
- Haddii lagugu wargeliyo, in aad gudaha joogto—meeshaada ku gabbo.

Ka hortagyo dheeraad ah:

- Iska ilaali taabashada hoorka tifqay, ceeryaanta ay hawadu waddo, iyo waxyaabaha kiimikada ah ee kala fur-furan. Dhamaan jirkaagu ha dednaado si aad u dhawrnaato. Xiro galoofyo, sharabaadyo, kabo, surwaallo, iyo shaar gacma-dheere ah.
- Ha cunin cunto hana cabbin biyo laqa yaabo in ay sumoobeen.

Waa in aad raacdaa dhamaan tilmaamaha ay ku siiyaan madaxda gurmada agaasimaysa. Tallaabooyinka la qaado haddii lagugu wargesho in aad meeshaada ku gabbato:

- Geli xubnaha qoyska iyo hebedka (eeyaha, iwm) gudaha sida ugu dhaqsaha badan ee suuraggalka ah.
- Xir oo qataar dhamaan albaabbada iyo daaqaadaha dibedda u furan. Xir layrshayaasha, dambarrada dabka, iyo intii albaab gudaha ah ee aad karaysid ee suuroggal ah.

DHACDOOYINKA MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)

- Xir eer kudheeshinnada iyo habka layrinta oo dhan. Dhismayaasha waaweyn, maamulaha dhismaha waa in uu habka laysiga oo dhan ka dhigaa 100 kiiba boqol mid ay laydhu gudaha ku wareeganayso si aan hawo dibedda ka timid u soo gelin dhismaha. Haddii aysan tani suurogaleyn, waa in habka laysiga oo dhan la bakhtiyaa.
- Aad gof nabdoon ooh ore loo qorsheeyey (qol ka sarreeya dhulka oo leh daloollada ugu yare e bannaanka u furan). Qaado raadiye beteri ku shaqeeya, biyo, sahay nadaafadeed, toosh, iyo guntintaada sahayda musiibo (oo ay tahay in ay ku jiraan waaraad hore loo jarjaray oo balaastiig ah oo lagu dedo daaqadaha iyo leyrshayaasha, koollo xarig, dhoobo la kuus-kuusi karo oo lagu awdo baqbaqayada, iyo shukumaan albaabka hoostiisa loogu talaggalay).
 - Xir albaabbada iyo daaqadaha qolka.
 - Albaabka ka koollee dhinacyada, hoos, iyo kor.
 - Ku ded daaqad kasta iyo leyrshe kasta oo qolka ku taalla hal waar oo balaastiig ah, adigoo dhinacyadana ka koollaynaya si uu u joogtoobo xayirkaasi.
 - Haddii ay jiraan dillaacyo ama godad qolka dhexdiisa, sida qasabadaha gala musqusha, ku buuxi dhoobada kuusan ama maaddooyin la mid ah.

Waa in ad raacdaa taxaddarradaan dheeraadka ah marka aad meel ku gabbanaysid oo ay jirto dhacdo maaddooyinka halista ah ku saabsan:

- Joog Qolka, adigoo raadiyaha ka dhegaysanaya idaacadaha gurmada xaaladaha degdegga ah, inta ay madaxdaadu kugula talinayaan in aad bixi kartid.
- Haddii ay madaxdu ka digto suuraggalnimada qarax bannaanka ah, daahyada culus iyo kuwa fudud, iyo harisyada qolka. Ka dheerow daaqadaha si aad isaga dhawrto dhaawac ka yimaada muraayad jabaysa.
- Marka ay madaxdu kula taliso dadka aaggaaga deggan in ay ka soo baxaan guryahooda nabdoon, fur albaabbada iyo daaqadaha oo dhan dabdeedna daar eer kudheeshinka iyo hababka leyrsga. Tallaabooyinka waxay sii xaaqayaan wixii kiimiko ahaa ee ku haray dhismaha.

DHACDOOYINKA MAADDOOYINKA HALISTA AH (WELI SOCDA)

Tallaabooyinka ay tahay in aad qaaddo marka ay dhacdo maaddooyinka halista ahi dhacdo:

- Haddii aad guurtey, ha ku soo laaban hoyga iyadoo aanay madaxdaada maxalliga ahi sheegin in ay nabdoon tahay.
- Markaad hoyga ku soo laabato, fur daagadaha iyo leyrdheyaasha, oo daar marwaxadaha si ay u keenaan leyr hor leh.
- Raac hannaanka sun-saaridda oo u isticmaal dadka iyo alaabta laga yaabo in ay kiimiko halis ah is taabteen:
 - Iyadoo ku xiran kiimikada, waxaa lagula talin karaa in aad meyrasho qabow oo dhan mayrato ama aad biyaha ka fogaatid oo hannaan kale raacdid.
 - Raadso daweyn caafimaad haddii ay astaamo kale oo aan caadi ahayn jiraan, markiiba.
 - Haddii aysan caawin caafimaad markaaba oollin, dhamaan dharkaaga sib oo si dhamaystiran u mayro (haddii aanay madaxda maxalligu uhu oran kiimikadu biyahay la falgashaa oo aysan si kale kuguka talinin) Goo dharka ay sida caadiga ah ahayd in la mariyo madaxa korkiisa markii la siibayo.
 - Isku beddel oo xiro dhar cusub, oo debecsan, raadsana daweyn caafimaad isla markiiba.
 - Dharkii iyo kabihii sumoobey geli weelal xiran oo dhuuqsan. Ha oggolaanin in ay is taabtaan maaddooyin kale. Weydii madaxda maxalliga ah sida habboon in loo qubo maryahaas iyo kabahaas.
 - U sheeg qof kasta oo ku taabta in laga yaabo in aad shay sumaysan xiriir taabasho la samaysay.
- Ka soo ogow madaxdaada maxalliga ah sida loo nadiifiyodhulkaga iyo hantidaada.
- U soo sheeg wixii uumi ah oo sii jira ama khatar kale ah xafiiskaaga maxalliga ah ee adeegga gurmada degdegga ah.

GURMADYADA KIIMIKOOYINKA AY QOYSASKU ISTICMAALAN

Ku dhawaan qoys kasta wuxuu isticmaalaa alaabto ay ku jiraan maaddooyin halis ah. Iyadoo ay dhab tahay in ay yar tahay khatarta shil kiimikaad, haddana ogaashaha sida loo isticmaalo kiimikooyinkaa ay qoysasku isticmaalaan, iyo sida loogu jawaabo markii ay shil keenaani, waxay yaraynaysaa khatarta loogu jiro in ay dhaawac keenaan.

Astaamaha sumowga waxaa ka mid ah:

- Neefsiga oo adkaada.
- Indhaha, maqaarka, iyo cunaha oo cuncunta iyo falcelin marinnada neefsiga ah.
- Midabka maqaarka oo is-beddela.
- Madax-xanuunno, aragti cawlan, iyo dawakhaad.
- Caajisnimo iyo falal aan agaasinnayn.
- Calool maroojin iyo shuban.

Sida ugu wanaagsan oo la isaga ilaasho khataraha ka yimaaada kiimikooyinkac ay qoysasku isticmaalaan waa in la isticmaalo hannaanka L.I.E.S. [X.K. B. A.]

- Xaddid caddadka maaddooyinka halista ah ee kuu kaydsan.
- Ku xannib alaabta weel la aqbalay, ku xaree gudaha armaajaadka, kana dhawr meelaha ay ololka ka taaban karaan.
- Baabbi'l haysiga aadan markaa u baahnayn adigoo si habboon u qubaya.
- Alaabta aan is-hayn karin kala sooc (Tusaale., maaddada kalooriin iyo ammooniya).

Aqri calaamadda ku dheggan shay walba oo raac dhamaan hannaanka nabdoonaanta ee uu soo jeediyey soo saaraha alaabta.

GURMADYADA KIIMIKOYINKA AY QOYSASKU ISTICMAALAN (WELI SOCDA)

Si aad u xaqiijiso si wacan u isticmaalidda kiimikooyinka qoysku isticmaalo, waa in aad:

- Akhridaa tilmaamaha oo dhan inta aadan isticmaalin alaab kiimikaad oo cusub. Hubi in aad kiimikaadka qoyska ku xaraysid meel ku aaddan sida ku qoran calaamadda ku dheggan alaabta.
- Kiimikooyinka ku xaree meel sugan oo nabdoon, oo aanay carruurta ka gaari karayn.
- Iska ilaali in aad isku qasto alaabaha kiimikaad ee qoyska. Qaac dhimasho keeni karaa ayaa ka soo baxa isku-qasidda kiimikooyinka qaar sida kalooriin iyo amooniya.
- Weligaa sigaar ha cabbin adigoo isticmaalaya kiimikooyinka qoyska. Ka dheerow ku isticmaalidda buufinta timaha, hoorarka wax lagu nadiifsho, alaabta riinjiga, iyo cayayaan-dileyaasha meel u dhow olol furan, nal dabeed, shamac baxaya, meel dabeed, burjikada lagu gubo geedaha, iwm. In kastoo aadan awood u lahayn in aad aragto ama uriso, uumigu wuxuu qabsan karaa dab waana qarxi karaa.
- Haddii ay kiimiko kaa tifiqdo, markiiba roogyo ku nadiifi. Ka taxaddar oo ilaali indhahaaga iyo oogadaada (xiro galoofyo iyo il-ilaaliye). U oggolow qiiqa ku jira roogagga in ay bannaanka ku uumi-baxaan, dabadeed qub rooggaa aad wax ku nadiifisay adigoo ku duubaya xaashida joornaalka oo markaa ku sii dhex ridaya bacaha xirma oo aad ku sii rideyso qashin-qubkaaga.

Halkanna waxaa ah soo-jeedinno kale :

- Ku dhig lambarka meesha kuugu dhaw ee xakamaynta sumowga meel u dhaw dhamaan telefoonnada. Markii la galo xaalad gurmada, waqti u heli maysid aad ku raadiso lambarrada telefoonnada.
- Baro sida loo ogaado maaddooyinka halista ah. In badanoo ka mid ah maaddooyinka halista ah mana dhadhamaan mana uraan, qaarna waxaa lagu gartaa in ay sababaan falcelinno dhinaca jirka ah sida indho biyo leh ama lallabbo. Maaddooyin kale oo halis ahaa ayaa ka jira dhulka hoostiisa waxaana lagu garan karaa muuqaalkooda sida saliidda ama xoorta-u-eg.
- Baro sida loo aqoonsado astaamaha sumowga.

Maxay tahay in la sameeyo inta lagu jiro gurmada kiimikada qoyska:

- Haddii shay sun ah la cunay:
 - Hel weelashii markiiba. Xirfadleyaasha caafimaad waxay u baahan karaan xog khaas ah ah oo laga helo weelka (asha) si ay u bixiyaan talada gurmada ee ugu fiican.
 - Wac xarunta xakamaynta sunta ee ah 1-800-222-1222 ama, haddii lagugula taliyo, 9-1-1 ama lambarka gurmada ee maxalliga ah. Si taxaddar leh u raac tilmaamaha hawl-wadeenka gurmada ama tilmaamaha taarwalaha. Ha ka siin wax cunto ah afka ilaa inta ay xirfadleyda caafimaad sidaa uga talinayaan.

GURMADYADA KIIMIKOYINKA AY QOYSASKU ISTICMAALAN (WELI SOCDA)

- Haddii ay kiimiko indhaha kaa gasho:
 - Raac tilmaamaha gurmada ee weelka ku yaal.
 - Sii wad hannaanka nadiifinta xitaa haddii uu dhibbanuhu muujiyo in uusan ama aysan wax xanuun ah oo kale dareemayn, dabadeed raadi daweyn caafimaad.
- Haddii ay jiraan dab ama qarax:
 - Ka guur degaanka markiiba.
 - U dhagaag ur-koraad iyo meel shishe si aad isaga dhawrto neefsiga qaac sun ah.
 - Kaw ac waaxda dabdemiska bannaanka (adigoo isticmaalaya telefoonka gacanta ama telefoonka deriska) adigoo ka nabdoon wax halis ah.

Kuwani waa tallaabooyin dheeraad ah oo ay tahay in aad qaaddo haddii ay dhacaan gurmada kiimikada oo qoys:

- Dhaq baabbacooyinka, gacmaha, ama meelaha kale ee jirka ah ee laga yaabo in ay wax kiimiko ah taabteen Kiimikooyinka waxay ku sii cuncunin karaan jirka ilaa inta toos looga dhaqayo.
- Tuur maryaha laga yaabo in ay sumoobeen. Kiimikooyinka qaar baan si dhan u dhaqmaynin. Tuuridda dharku waxay ka hortegaysaa in mustaqbalka ay isla kiimikadii ku taabato.
- Ku dhagaag daweynta gargaarka-koowaad oo u same dhibbanayaasha ay kiimiko gubtay. Raac tallaabooyinkan si aad u samayso gargaarka koowaad:
 - Wac 9-1-1 si aad caawin gurmada u hesho.
 - Dhaawaca hareerhiisa dahabyada iyo dharkaba ka siib.
 - Biyo nadiif ah oo qabow meesha gubatay muddo 15 ilaa 30 daqiiqo ah.
 - Si debecsan u ded boogta adigoo isticmaalaya dhaymo nadiif ah ama la jeermi diley. Hubi in dhaymadu aysan mudayn meesha gubatay.
 - U xawil dhibbanaha xirfadle caafimaad si uu u sii daweyo.